



## Go'itaanada Korontada

- Ka war hay dadka waaweyn iyo dadka caawimada gaarka ah u baahan si aad u hubiso inay nabad qabaan.
- Taxaddar dheeri ah samee haddii aad dibadda ubaxdo si aad u eegto waxyeelada duufaanta kaddib. Xarkaha korontada oo dhulka yaal ama soo laalaada ayaa kuugu qarsoomi kara baraf tuurmay, geedo, ama qashin, waxaana suurtoagal ah inuu waayirku koronto sido. Marnaba haysku dayin inaad taabato ama dhaqaajiso waayirada soo dhacay. Ka fogee caruurta iyo xoolaha rabbaayadda ah.
- Ha taabin waxkasta oo waayirada korontadu taabanayaan, sida laamaha geedaha ama dayrarka. Markasta u qaado in waayarka soo dhacay sido koronto. Wac shirkadda laydhka si aad uga warbixiso go'itaanada korontada.
- Hubi in tooshashka iyo raadiyaha gacanta lagu qaadi karo ay shaqaynayaan, iyo inaad baytaryo dheeri ah haysato. Raadyuhu waa il muhiim oo lagala socdo cimilada iyo xogta degdegga ah marka lagu gudo jiro duufaan.
- Haddii aad isticmaalayso matoorrada korontada dhaliya, akhri, fahan, raacna tilmaamaha soo saaraha. Markasta kaga shaqaysii matoorka korontada dhaliya dibadda kana fogee daaqadaha iyo albaabada. Hubi in matoorkaaga korontada dhalinaya dhulka si wacan uhaysto una xidhan yahay waayo waxa sharci ahaan lagu qabsan karaa waxyeelada ama dhaawaca uu ugaysto dadka ama hantidooda taasoo ka dhalan karta in si qaldan loo xidho ama looga shaqaysiiyo qalabka.
- Hubi in qalabka dareema Carbon Monoxide-ku (CO) inay si sax ah u shaqaynayaan ayna ku jiraan baytaryo cusubi.
- Gee halka qabow ugu sarraysa tallaajadda iyo qaboojiyaha (xasuusnowna inaad dib caadi ugu celiso kadib marka korontadu soo noqoto). Marka korontadu go'an tahay, ha furin albaabka tallaajadda ama qaboojiyaha. Cunnadu waxay ahaan kartaa qaboow marka tallaajaddu buuxdo illaa 24 saacadood, qaboojiyaha buuxana illaa 48 saacadood (24 saacadood hadduu ay qayb ahaan buuxdo). Haddii aad isticmaasho daawo ubaahan in tallaajadda la galiyo, weydii farmashiilahaaga wixii tilmaamo ah ee kaydinta la xidhiidha marka korontadu wakhti dheer go'do.

- Hubi inaad markasta haysato Agabka Xaaladaha Degdegga ah ee Guryaha Wakhtiga Jiilaalka oo dhammaystiran tanoo ay ka mid yihiin tooshashka, raadiyaha gacanta lagu qaadi karo, baytaryo dheeri ah, agabka gargaarka degdegga ah, biyaha caagadda, cunnada aan hore uxumaan iyo walaxda qassaacadaha lagu furo.